



Tallaabo taariikhiya oo hore loo qaaday laguna maalgalinayo K-12

Gacaliye Waalidiinta PPS,

Waa dareen muujinaya rajo iyo dhiirigalin oo aan rabo inaan idinla wadaago warka ku saabsan mustaqbalka nidaamka iskuuladeena oo aan anigu aamisanahay in uu raad joogta ah ku yeelanayo sidii aan awood ugu yeelan lahayn inaynu aad ugu addeegno ardaydeena heerka ugu fiican. Xeer dejiyaaasha Gobolka Oregon waxay ansixiyeen iyada oo Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown saxeexday xeerka magaciisu yahay Xeerka Guusha Ardayda, kaasi oo ah maalgalin dhammeystiran oo dheeraad ah looguna talagalay sanad in loo qaybiyo dhammaan dugsiyada ku yaala gobolkan lacagtaasi oo dhan qiyaaso ahaan \$ 1 billion (Hal Bilyan). Arrintani waxay guul weyn oo taariikhiya u tahay waxbarashada dadweynaha guud ahaan iyo dugsiyada dadweynaha Portland gaar ahaan. Hadda ayey bilaabmeysaa shaqadeenu sidii aan u qorsheyn lahayn sidii loo isticmaali lahaa dhaqaalaha dheeraadka ah qeybteena laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2020-21, taasi siyaabo fara badan u horumarin doonto waayo-aragnimada waxbarashada ee dhammaan ardeydeena kala duwan waxbarashadooda.

Sida aad intiina badani aad ka warqabtaan, waxa aan Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) lixdii bilood ee la soo dhaafay u diyaarineynay higsii cusub oo dhammeystiran laguna hubinayo himilooyinka xaqiijinaya in ardayda qalin-jabneysa loo diyaariyo horumarka isbedelada degdega ah ee dunida ku soo kordhaya. Inta hawshani lagu gudo jiro, taasi waxa ay ka mid ahayd warcelinta tallooyinka ay kumanaan ardaydeena ah, waalidiinta, macalimiinta, xubnaha bulshada, kuwo kale oo fara badan ay soo jeediyeen. Waxa aan bilownay in aan riyadeena mustaqbalka iyo ta mustaqbalka ardeydeenu noqoto mid aad u weyn. Marka aad eegto heerka maalgalintani dhaqaale ee gobolka, waxa ay aniga ii dhiirigalineysaa si laxaad leh oo aan bilaabi karno sidii aan riyoooyinkani ugu dhigi lahayd kuwo run noqda.

Bal ka waran in aad awoodi karto in aad addeegyo qoto dheer siiso ardayda ka hor inta ayna xitaa soo galin xannaanada bilowga (kindergarten), adigoo u diyaarinaya horumarka ay ka gaarayaan sidii ay ugu guuleysan lahaayeen 12 sanno ee soo socota waxbarashadooda. Bal ka waran ardayda bilowga waxbarashada hore (preschooler) marka ay u kala gudbayaan fasalada kala duwan iyaga oo helaya gargaarkii ku haboonaa ee la midka ahaa habka ay wax u baranayaan iyo dadaalkooda. Bal iyana waxaad qiyaastaa ardaydaasi oo hesha barnaamijyo dhammeystiran oo farshaxanka muuqaalka isku dhafan, xirfadaha shaqo, casharo waxbarasho oo dhinaca farsamada oo ay taageerayaan teknoolajiyada casriga ah, iyo roobatka, manhaj la casriyeeyey.

Isbedelkani waa ka aan la rabno in iskuuladeena ku sameyno, iyada oo tallaabooyinka xeer dejiyaasheenu ay ku soo afmeereen tobanaan sano oo aan iskuuladeenu K-12 helin maalgalintii dhaqaale ee ay u baahnaayeen iyada oo dhaqaalahani inaga caawin doonto himiladeenii. Fadlan igala qeybqaado in aan u mahadcelin cid kasta oo ka qeybqaadatay in xeerka dhaqaale ee lagu taageerayo iskuulada sidoo kalena aan hubino meel markiisa. Go'aano dhowr ah ayaa lagu tilmaami karaan inay yihiin kuwa taariikhiyal. Xeerka Guusha Ardaydu wuxuu yahay mid ka mid ah.

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada